الصومالية

رمضان شهر العتق من النار

Ramadaan waa bisha naarta layska xureeyo

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا كُتِبَ عَلَيْكُمُ الصِّيَامُ كَمَا كُتِبَ عَلَى الَّذِينَ مِنْ قَبْلِكُمْ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ}

(**Kuwa xaqa rumeeyow waxaa laydinku waajibiyay soonka sidii loogu waajibiyay kuwii idinka horreeyay si aad u dhawrsataan**), waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa kaasoo ku yiri xadiiskiisa sharfta leh:

(مَنْ صَامَ رَمَضَانَ إِيمَانًا وَاحْتِسَابًا، غُفِرَ لَهُ مَا تَقَدَّمَ مِنْ ذَنْبِهِ)

(**Qofkii u soomo Ramadaan iimaan iyo ajar raadis waxaa loo dhaafayaa wixii hormaray dambigiisa**)

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

Intaas kaddib:

Ilaahay – *cazza wajalla* – bisha Ramadaan ee barakaysan wuxuu ku gaaryeelay waxyaabo badan oo aan bilaha kale lahayn.

Waxaa ka mid ah inay tahay **bisha hanuunka** oo Ilaahay soo dejiyay kutubta samaawiga, Allaha xaqqa subxaanahu watacaalaa wuxuu leeyahay:

(شَهْرُ رَمَضَانَ الَّذِي أُنزِلَ فِيهِ الْقُرْآنُ هُدًى لِّلنَّاسِ وَبَيِّنَاتٍ مِّنَ الْهُدَىٰ وَالْفُرْقَانِ)

(**Waa bisha Ramadaan ee la soo dajiyay dhexdeeda Quraanka, isagoo hanuun dadka u ah, iyo caddeyn hanuun iyo kala bixin (xaqa iyo baadhilka**).

Nabigeena wuxuu leeyahay (*naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee*):

(أُنْزِلَتْ صُحُفُ إِبْرَاهِيمَ أَوَّلَ لَيْلَةٍ مِنْ شَهْرِ رَمَضَانَ ، وَأُنْزِلَتِ التَّوْرَاةُ لِسِتٍّ مَضَيْنَ مِنْ رَمَضَانَ ، وَأُنْزِلَ الْإِنْجِيلُ لِثَلَاثَ عَشْرَةَ مَضَتْ مِنْ رَمَضَانَ ، وَأُنْزِلَ الزَّبُورُ لِثَمَان عَشْرَةَ خَلَتْ مِنْ رَمَضَانَ ، وَأُنْزِلَ الْقُرْآنُ لِأَرْبَعٍ وَعِشْرِينَ خَلَتْ مِنْ رَمَضَانَ)

(**Suxufta Ibraahiim waxaa lasoo dejiyay habeenka ugu horreeya ee Ramadaan, Towraadna waxaa lasoo dejiyay lixda Ramadaan, Injiilna waxaa lasoo dejiyay seddex iyo tobanka Ramadaan, Zabuurna waxaa lasoo dejiyay siddeed iyo tobanka Ramadaan, Qur'aankana waxaa lasoo dejiyay afar iyo labaatanka Ramadaan**).

Waxaa ka mid ah inay tahay **bisha ducada**, daacooyinka ugu waaweyn ayay ka mid tahay ducada, iyo waxyaalaha Ilaahay addoonka ugu dhowaado, qofka fiirfiirinaya kitaabka Alle – *cazza wa jalla* – wuxuu arkayaa aayadda ducada oo dhexda ugu jirto aayadaha soonka, Allaha xaqqa subxaanahu wuxuu leeyahay:

(وَإِذَا سَأَلَكَ عِبَادِي عَنِّي فَإِنِّي قَرِيبٌ أُجِيبُ دَعْوَةَ الدَّاعِ إِذَا دَعَانِ فَلْيَسْتَجِيبُوا لِي وَلْيُؤْمِنُوا بِي لَعَلَّهُمْ يَرْشُدُونَ)

(**Hadday ku warsadaan addoomadaydu xaggayga anigu waan dhawahay waana aqbalaa baryada markay i baryaan, ee ha i maqlaan iyaguna hana i rumeeyaan si ay u hanuunaan**.), waxaa ku jirto meesha qofka sooman ducadiisa waxaa loo rajeeyaa in la aqbalo, Nabigeena wuxuu leeyahay (*naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee*):

(ثَلَاثٌ لَا تُرَدُّ دَعْوَتُهُمْ ، الإِمَامُ العَادِلُ ، وَالصَّائِمُ حِينَ يُفْطِرُ ، وَدَعْوَةُ المَظْلُومِ يَرْفَعُهَا فَوْقَ الغَمَامِ ، وَتُفَتَّحُ لَهَا أَبْوَابُ السَّمَاءِ ، وَيَقُولُ الرَّبُّ (عَزَّ وَجَلَّ) : وَعِزَّتِي لَأَنْصُرَنَّكِ وَلَوْ بَعْدَ حِينٍ)

(**Seddex qof ducadooda lama soo celiyo, xaakimka caadilka ah, iyo qofka sooman markuu afurayo, iyo ducada qofka la dulmiyay, daruurta ayuu ka sarreysiinayaa, albaabada cirka ayaana loo furayaa Allena –** *cazza wajalla* **- wuxuu dhahayaa: cisadayda ayaan ku dhaartee waan kuu gargaarayaa muddo kaddibba ha noqotee**).

Waxaa laga yaabaa arrimahan u gaarka ah bishan inay ugu muhimsan tahay Alle – *cazza wajalla* – inuu ka dhigay Ramadaan **bisha naarta layska xureeyo**, Nabigeena wuxuu leeyahay (*naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee*):

(إِذَا كَانَ أَوَّلُ لَيْلَةٍ مِنْ رَمَضَانَ صُفِّدَتِ الشَّيَاطِينُ ، وَمَرَدَةُ الْجِنِّ ، وَغُلِّقَتْ أَبْوَابُ النَّارِ ، فَلَمْ يُفْتَحْ مِنْهَا بَابٌ ، وَفُتِحَتْ أَبْوَابُ الْجِنَانِ فَلَمْ يُغْلَقْ مِنْهَا بَابٌ ، وَنَادَى مُنَادٍ يَا بَاغِيَ الْخَيْرِ أَقْبِلْ، وَيَا بَاغِيَ الشَّرِّ أَقْصِرْ ، وَلِلَّهِ عُتَقَاءُ مِنَ النَّارِ)

(**Markuu yahay habeenka ugu horreeya ee Ramadaan shayaadiinta ayaa la katiinadeynayaa iyo jinka madaxa adag, waxaa la xirayaa albaabada naarta, albaab lagama furayo, waxaa la furayaa albaabada**

jannooyinka, albaabna lagama xirayo, qof ayaa dhawaaqaya oo leh: khayr dooneyow kaali, shar dooneyow ka har, Ilaahayna waxaa u sugan kuwa naarta laga xureeyo).

Wuxuu leeyahay Nabiga (*naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee*):

(إِنَّ لِلَّهِ عز وجل عِنْدَ كُلِّ فِطْرٍ عُتَقَاءَ ، وَذَلِكَ فِي كُلِّ لَيْلَةٍ)

(**Ilaahay waxaa u sugan afur kaste kuwa naarta laga xureeyo, taasna waa habeen kaste**), waxaa loola jeedaa ka xoreynta naarta qofka Ilaahay siiyay sharaftan ballaaran iyo nimcadan weyn inuusan waligiisa naarta galeynin.

Soonka wuxuu ka mid yahay albaabada khayrka iyo waxyaalaha ka reeba addoonka cadaabta Ilaahay, Nabigeena (*naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee*) wuxuu leeyahay:

(الصَّوْمُ جُنَّةٌ – أي وقاية – يَسْتَجِنُّ بِهَا الْعَبْدُ مِنَ النَّارِ)

(**Soonka waa gaashaan addoonka wuxuu isaga ilaalinayaa naarta**).

Wuxuu leeyahay Nabiga (*naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee*):

(مَا مِنْ عَبْدٍ يَصُومُ يَوْمًا فِي سَبِيلِ اللهِ إِلَّا بَاعَدَ اللهُ بِذَلِكَ الْيَوْمِ وَجْهَهُ عَنِ النَّارِ سَبْعِينَ خَرِيفًا)

(**Addoon ma jiro oo u soomaya hal maalin Ilaahay dartii hadday dhacdo, Ilaahay maalintaas darteeda naarta ayuu kaga fogeyaa wejigiisa toddobaatan sano**).

Waxaa laga wariyay Muacaad bin Jabal -*Ilaahay raalli haka noqdee* – inuu yiri: Nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – ayaan safar kula jiray maalin ayaan aad ugu dhowaaday annagoo socono, markaan arkay asagoo kaligiisa ah waxaan dhahay: rasuulkii Ilaahayow ii sheeg camal jannada i galinaya naartana iga fogeynaya, wuxuu yiri: (**wax weyn ayaad i weyddiisay wuuna u fudud yahay qofka Ilaahay u fududeeyo, Ilaahay ayaad caabudeysaa waxna lama wadaajinaysid, salaadda ayaad oogeysaa sakadana waad bixinaysaa soonkana waad soomaysaa xajkana waad gudanaysaa**) kaddib wuxuu yiri: (**maku tusaa albaabada khayrka? Soonka waa gaashaan, sadaqadana waxay gefka u damisaa sida biyaha ay dabka u damiyaan…**).

sidoo kale soonka wuxuu ka mid yahay kuwa shafeecadooda Ilaahay – *cazza wajalla* – aqbalo maalinta qiyaame, wuxuu leeyahay Nabiga (*naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee*):

(الصِّيَامُ وَالْقُرْآنُ يَشْفَعَانِ لِلْعَبْدِ يَوْمَ الْقِيَامَةِ ، يَقُولُ الصِّيَامُ : أَيْ رَبِّ ، مَنَعْتُهُ الطَّعَامَ وَالشَّهَوَاتِ بِالنَّهَارِ فَشَفِّعْنِي فِيهِ ، وَيَقُولُ الْقُرْآنُ: مَنَعْتُهُ النَّوْمَ بِاللَّيْلِ فَشَفِّعْنِي فِيهِ قَالَ: فَيُشَفَّعَانِ)

(**Soonka iyo Qur'aanka waxay u shafeecaan addoonka maalinta qiyaame, soonka wuxuu leeyahay: rabbiyow waxaan u diiday cuntada iyo shahwada dharaartii ee shafeecadeyda aqbal, Qur'aankana wuxuu leeyahay waxaan u diiday hurdada habeenkii ee shafeecadeyda aqbal**).

Sidoo kale soonka waa sabab ka mid ah **sababaha dambidhaafka**, iyo waddo ka mid ah waddooyinka jannada, Allaha xaqqa ah subxaanahu wuxuu u yaboohay addoomihiisa sooman dambidhaaf iyo ajar weyn wuxuu yiri:

(إِنَّ الْمُسْلِمِينَ وَالْمُسْلِمَاتِ وَالْمُؤْمِنِينَ وَالْمُؤْمِنَاتِ وَالْقَانِتِينَ وَالْقَانِتَاتِ وَالصَّادِقِينَ وَالصَّادِقَاتِ وَالصَّابِرِينَ وَالصَّابِرَاتِ وَالْخَاشِعِينَ وَالْخَاشِعَاتِ وَالْمُتَصَدِّقِينَ وَالْمُتَصَدِّقَاتِ وَالصَّائِمِينَ وَالصَّائِمَاتِ وَالْحَافِظِينَ فُرُوجَهُمْ وَالْحَافِظَاتِ وَالذَّاكِرِينَ اللَّهَ كَثِيرًا وَالذَّاكِرَاتِ أَعَدَّ اللَّهُ لَهُم مَّغْفِرَةً وَأَجْرًا عَظِيمًا)

(**Raga muslimiinta ah iyo haweenka muslimaadka ah, ragga mu'miniinta ah iyo haweenka mu'minaadka ah, ragga Alle adeeca iyo haweenka adeeca, ragga runta sheega iyo haweenka runta sheega, ragga samra iyo haweenka samra, ragga u khushuuca Ilaahay iyo haweenka u kushuuca, ragga sadaqaysta iyo haweenka sadaqaysta, ragga sooma iyo haweenka sooma, ragga dhawra farjiyadooda iyo haweenka dhawra, iyo ragga in badan Alle xusa iyo haweenka in badan xusa, wuxuu Alle u diyaariyay dambidhaaf iyo ajar weyn**) wuxuu leeyahay Nabiga (*naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee*):

(مَنْ صَامَ رَمَضَانَ إِيمَانًا وَاحْتِسَابًا ، غُفِرَ لَهُ مَا تَقَدَّمَ مِنْ ذَنْبِهِ)

(**Qofkii u soomo Ramadaan iimaan iyo ajar raadis waxaa loo dhaafayaa wixii hormaray dambigiisa**)

wuxuu leeyahay Nabiga (*naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee*):

(مَنْ قَامَ رَمَضَانَ إِيمَانًا وَاحْتِسَابًا غُفِرَ لَهُ مَا تَقَدَّمَ مِنْ ذَنْبِهِ)

(Qofkii u istaago Ramadaan iimaan iyo ajar raadis waxaa loo dhaafayaa wixii hormaray dambigiisa), waxaa jiro habeen qofkii Ilaahay ku arsaaqo salaaddisa iyo akhriska Qur'aanka iyo ducada oona la waafajiyo

daacada Alle – *cazza wajalla* – dambigiisa ayaa loo dhaafayaa, waa habeenka laylatuqadarka, wuxuu leeyahay Nabigeena (*naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee*):

(مَنْ قَامَ لَيْلَةَ الْقَدْرِ إِيمَانًا وَاحْتِسَابًا غُفِرَ لَهُ مَا تَقَدّمَ مِنْ ذَنْبِهِ)

(**Qofkii habeenka laylatulqadarka u istaago iimaan iyo ajar raadis waxaa loo dhaafayaa wixii hormaray dambigiisa**).

Soonka waa **waddo ka mid ah waddooyinka jannada** wuxuu leeyahay Nabigeena (*naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee*):

(إِنَّ فِي الْجَنَّةِ غُرْفَةً يُرَى ظَاهِرُهَا مِنْ بَاطِنِهَا، وَبَاطِنُهَا مِنْ ظَاهِرِهَا، أَعَدَّهَا اللَّهُ لِمَنْ أَطْعَمَ الطَّعَامَ، وَأَلَانَ الْكَلَامَ، وَتَابَعَ الصِّيَامَ، وَصَلَّى وَالنَّاسُ نِيَامٌ)

(**Jannada waxaa ku yaallo qol, waxaa laga arkaa bannaankiisa gudihiisa, gudihiisana waxaa laga arkaa bannaankiisa, Ilaahay wuxuu u diyaariyay qofkii cunto bixiyo hadalkana jilciyo soonkana israaciyo salaadna tukado dadka iyagoo hurdaya**). Abuu Hureyra -*Ilaahay raalli haka noqdee* – waxaa laga wariyay in rasuulka -*naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – uu weyddiiyay asxaabtiisa maalin:

(مَنْ أَصْبَحَ مِنْكُمْ الْيَوْمَ صَائِمًا؟) قَالَ أَبُو بَكْرٍ: أَنَا، قَالَ: (مَنْ عَادَ مِنْكُمْ الْيَوْمَ مَرِيضًا؟) قَالَ أَبُو بَكْرٍ: أَنَا قال: (مَنْ شَهد مِنْكُمْ الْيَوْمَ جَنَازَةً؟) قَالَ أَبُو بَكْرٍ: أَنَا، قَالَ: (مَنْ أَطْعَمَ الْيَوْمَ مِسْكِينًا؟) قَالَ أَبُو بَكْرٍ: أَنَا ، فقَالَ صلى الله عليه وسلم: (مَا اجْتَمَعْت هذهِ الخِصَال فِي رجل في يوم إِلاَّ دَخَلَ الْجَنّةَ).

(**Yaa waabariistay maanta asoo sooman?**) Abuu Bakar ayaa yiri: aniga, wuxuu yiri: (**yaa maanta booqday qof jirran?**) Abuu Bakar ayaa yiri: aniga, wuxuu yiri: (**Yaa maanta raacay janaaso?**) Abuu Bakar ayaa yiri: aniga, wuxuu yiri: (**Yaa maanta maskiin quudiyay?**) Abuu Bakar ayaa yiri: aniga, wuxuu yiri - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -: (**sifooyinkan kuma kulmaan qof hal maalin, hadday dhacdana jannada ayuu galayaa**), Markuu u yimid Abuu Umaama Albaahiliy -*Ilaahay raalli haka noqdee* – rasuulkii Ilaahay - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - asoo weyddiinayo: rasuulkii Ilaahayow i far camal janno aan ku galayo wuxuu yiri:

(عَلَيْكَ بِالصّوْمِ فَإِنّهُ لَا مِثلَ لَهُ)

(Soonka laasim wax u dhigmo ma jiree).

Soonka waa sir ka dhaxeysa addoonka iyo rabbigiisa, qof xaqiiqadiisa ogaan karo ma jiro, qofka sooman

kaligiisa ayuu noqon karaa cid arkayso ma jirto oo aan Alle – *cazza wa jalla* – ahayn, wixii Ilaahay ka reebay ayuu sameyn karaa, mana sameynayo maxaayeelay si dhab ah wuxuu u og yahay inuu leeyahay rabbi arrinkiisa oo dhan daalacanayo Ilaahay dartiisa ayuu u dhaafayaa isagoo ka cabsanaya ciqaabtiisa rajana ka qaba abaalkiisa, kalsoonina ka haysta inuu Ilaahay subxaanahu uu la jiro, Allaha xaqqa wuxuu leeyahay:

(أَلَمْ تَرَ أَنَّ اللَّهَ يَعْلَمُ مَا فِي السَّمَاوَاتِ وَمَا فِي الْأَرْضِ مَا يَكُونُ مِن نَّجْوَىٰ ثَلَاثَةٍ إِلَّا هُوَ رَابِعُهُمْ وَلَا خَمْسَةٍ إِلَّا هُوَ سَادِسُهُمْ وَلَا أَدْنَىٰ مِن ذَٰلِكَ وَلَا أَكْثَرَ إِلَّا هُوَ مَعَهُمْ أَيْنَ مَا كَانُوا ثُمَّ يُنَبِّئُهُم بِمَا عَمِلُوا يَوْمَ الْقِيَامَةِ إِنَّ اللَّهَ بِكُلِّ شَيْءٍ عَلِيمٌ)

(**Ma ogtahay in Ilaahay ogyahay cirka iyo dhulka waxa ku jira, seddexdii faqiba Ilaahay baa afreeya, shantana Ilaahay baa Lixeeya; waxa ka yar iyo waxa ka badanba Ilaaahay baa la jooga meeshay ahaadaanba, wuxuuna uga warrami waxay camal faleen maalinta qiyaamo Ilaahayna wax walba waa ogyahay**).

Soonka wuxuu ka mid yahay cibaadooyinka Ilaahay ku sharfay u tiirinta naftiisa, abaalkoodana isku gaaryeelay Nabigeena - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – wuxuu leeyahay:

(كلُّ عملِ ابنِ آدمَ لهُ إلا الصومَ ، فإنّه لي وأنا أُجْزي بهِ)

(Alle – cazza wajalla – wuxuu yiri: Camal kaste aadanaha isagaa iska leh soonka mooyee aniga ayuu ii sugnaaday anigaana ka abaalmarinayo). Riwaayo kale waxaa ku sugan: (**camalka aadanaha oo dhan waa la laballaabayaa, xasanada toban ayay u dhigantaa ilaa toddoba boqol laballaab, Allaha sarreeya wuxuu yiri: soonka mooyee aniga ayuu ii sugnaaday anigaana ka abaalmarinayo**…) sidaa darteed culimada waxay leeyihiin: waxaa ku filan soonka oraahda Alle subxaanahu: (**soonka anaa iska leh**) inuu ka fadli badan yahay cibaadooyinka kale, waxaa la sheegay sababta Ilaahay soonka isu tiiriyay inuu yahay soonka cibaabada aan Ilaahay waxan ahayn loogu dhowaanin, soonka waa cibaado Ilaahay u baraxtiran, istusna ma galo soonka, waxaa la sheegay: inuu yahay cibaadada loogu jecel yahay Alle agtiisa – *cazza wajalla* –.

Qofka sooman mar kaste Ilaahay ayuu ka dhowrsanayaa, wuxuu ku dadaalayaa inuu ka faa'idaysto bishan barakaysan, naftiisa ayuu u bandhigayaa barkooyinka Alle, isagoo rajeynaya inuu ka mid noqdo dadka naarta laga xureynayo.

Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka

***

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha haato midka lagu khatimay anbiyada Ilaahay iyo rusushiisa oo ah sayidkeena Muxamed - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaantood.

Walaalaha islaamka ahow:

Soonka wuxuu sabab u noqonaya in naarta laga xuroobo waa soonka ka reebaya qofkiisa dhaqan xumo, kana celinaya macsida, una xaqiijinaya cabsida Alle, taasoo ah ujeeddada soonka iyo natiijadiisa, xaaraan ma cunayo, dadka cirdigoodana ma tiimbanayo, qofna ma xamanayo, dadna iskuma dirayo, markhaati beenna uma dhowaanayo, mana oranayo wixii Alle – *cazza wajalla* – raalligalinaya mooyee, xumaantana kuma celanayo iyada oo kale, wuxuu ku reebayaa mid ka fiican, wuxuu ku dhaqmayaa dadka sooman akhlaaqdooda, Alle wuxuu yiri:

(وَإِذَا سَمِعُوا اللَّغْوَ أَعْرَضُوا عَنْهُ)

(**Markay maqlaan hadalka macnadarran way ka jeedsadaan**) wuxuu yiri subxaanahu:

(وَالَّذِينَ هُمْ عَنِ اللَّغْوِ مُعْرِضُونَ)

(**Oo ah kuwa hadalka macnadarran ka jeedsada**.) wuxuu yiri Alle:

(ادْفَعْ بِالَّتِي هِيَ أَحْسَنُ السَّيِّئَةَ)

(**Ku reeb tan wanaagsan midda xun**).

Wuxuu yiri nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -

(والصِيام جُنَة ،فَإِذَا كَانَ يَوْمُ صَوْمِ أَحَدِكُمْ ، فَلَا يَرْفُثْ وَلَا يَصْخَبْ ، فَإِنْ سَابَّهُ أَحَدٌ أَوْ قَاتَلَهُ ، فَلْيَقُلْ : إِنِّي امْرُؤٌ صَائِمٌ)

(**Soonka waa gaashaan, haddii midkiina uu sooman yahay yuuna afxumo ku dhaqaaqin yuuna qaylinin haddii qof caayo ama la dagaallamo ha yiraahdo: waxaan ahay qof sooman**)

Wuxuu yiri nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -:

(لَيْسَ الصِّيَامُ مِنَ الأَكْلِ وَالشُّرْبِ ، إِنّمَا الصِّيَامُ مِنَ اللَّغْوِ وَالرّفَثِ ...)

(**lagama soomo kaliya cuntada iyo cabbitaanka, waxaa laga soomayaa hadalka macnadarran iyo afxumada**…), sababha naarta lagaga xuroobo waxaa ka mid ah inuu difaaco qofka muslimka cirdiga walaalkiisa

oo maqan, rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu yiri:

(مَنْ ذَبَّ عَنْ لَحْمِ أَخِيهِ بِالْغِيبَةِ كَانَ حَقًّا عَلَى اللَّهِ أَنْ يُعْتِقَهُ مِنَ النَّارِ")

(**Qofkii ka difaaco xanta walaalkiisa oo maqan Ilaahay waxaa korkiisa ah inuu naarta ka xoreynayo**)

Qofka si dhab u sooman oo ajarka soonka helaya waa midka soonka raadkiisa uu ka muuqdo dhaqankiisa uu dadka kula dhaqmo, soonka wuxuu qofka baraa inuu naftiisa qabto oo uu ka adkaado ilaa ay ka gaarto wixii khayrkeeda ku jiro adduun iyo aakhiraba, nafta waa mid xumaanta aad u farto qofka rabbigay u naxariisto mooyee, qofka naftiisa hadduu xariga u daayo halaag ayay ku ridaysaa, haddii uu gacanta ku dhigana oo uu qabto wuxuu u kexeynayaa meelaha ugu sarreeya, tanna uma suurtagalyso qofkii soon dhab ah soomay mooyee, oo dareensan weynida rabbigiisa, oo ay ka soomeen calooshiisa iyo farjigiisa iyo carrabkiisa iyo dhammaan xubnihiisa wixii Alle – cazza wajalla – xarrimay oo dhan.

Sidoo kale qofkii soon dhab ah sooman ayaa ah qofka camalkiisa hagaajinaya, Ilaahayna u baraxtiraya, kuna mashquulaya in laga aqbalo, waa kanaa kaliilka Allaha raxmaanka sayidkeena Iraahiim - *naxariis iyo*

nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - wuxuu weyddiinayaa rabbigiisa in laga aqbalo isagoo gudanaya camal weyn oo Ilaahay – *cazza wajalla* – amray, waa dhisidda kacbada sharafta leh, Ilaahayga xaqqa ah – *tabaaraka watacaalaa* – arrinkaas wuxuu ka yiri:

(وَإِذْ يَرْفَعُ إِبْرَاهِيمُ الْقَوَاعِدَ مِنَ الْبَيْتِ وَإِسْمَاعِيلُ رَبَّنَا تَقَبَّلْ مِنَّا إِنَّكَ أَنتَ السَّمِيعُ الْعَلِيمُ)

(**Xusuuso markuu kor u qaadayay Nabi Ibraahim tiirarka kacbada iyo Nabi Ismaaciil iyagoo leh rabbiyow naga aqbal adaa waxna maqla waxna ogee**,)

Sayidkeena Cali -*Ilaahay raalli haka noqdee* – wuxuu dhihi jiray: (ugu dadaala aqbalitaanka camalka si ka badan camalka laftiisa) miyaydan maqlin oraahda Allaha sarreeya:

(إِنَّمَا يَتَقَبَّلُ اللَّهُ مِنَ الْمُتَّقِينَ)

(**Wuxuu uun Alle ka aqbalaa kuwa dhawrsada**)

Ilaahayow naga mid yeel kuwa aad naarta ka xoreynayso aadna aqbashay